Keydaka macluumaadka kireystaha

Keydka macluumaadka kireystaha waxaa maamula shirkado gaar ah oo ururiya macluumaadka kireystaha oo macluumaadka ka dhiga mid ay heli karaan wakiilada iyo mulkiilayaasha. Mulkiilayaasha iyo wakiiladu waxay isticmaalaan keydka macluumaadka kireystaha si ay u qiimeeyaan 'khatartooda ganacsiyeed' iyagoo eegaya taariikhda kireysiga ee arjiilaha markay soo dalbadaan guri kiro ah.

➲ Laga bilaabo Sibteembar 2011, isbedelada *Residential Tenancies Act 1997* waxay xaddidayaan isticmaalka keydadka macluumaadka kireystaha. Isbedeladaas waxaa lagu sharxay warqadan xaqiiqda.

Markaad dalbato guri ijaar ah

Haddii mulkiilaha ama wakiilku badanaa isticmaalaan keydka macluumaadka kireystaha si ay u qiimeeyaan codsiyada kireysiga, waa inay kugu soo wargeliyaan tan qoraal ahaan wakhtiga aad soo dalbato – haddii ay rabaan inay u isticmaalaan codsigaaga iyo in kale.

Ogeysiiskani waa inuu sheegaa magaca keydka macluumaadka ee la isticmaalayo, iyo in keyda macluumaadka loo isticmaalayo jeegareynta taariikhda kireysiga ee arjiilaha. Ogeysiisku waa inuu sidoo kale lahaadaa faahfaahinta xiriirka shirkada keydka macluumaadka.

Haddoo la helo liiska, mulkiilaha ama wakiilku wuxuu heystaa 7 maalmood si uu kuu siiyo ogyesiis qoraal ah oo sheegaya:

> magaca keydka macluumaadka

< inay keydka macluumaadku leedahay macluumaad shakhsiyeed oo adiga kugu saabsan

< magaca qof kasta oo qoray macluumaadka (haddii la helayo)

< sida qoraalka looga saari karo ama loo sixi karo

Goorma ayaa kireystaha lagu qori karaa?

Macluumaad kasta oo ku qoran keydka macluumaadka kireystaha waa inuu noqdaa mid sax ah, cad oo dhammeystiran. Waa inuu khuseeyaa oo kaliya jebin khaas ah oo ah heshiiska kireysiga ama mid ka mid ah sharci jebintaan *Residential Tenancies Act 1997* ee soo socota:

> waxyeelo xun oo guriga loo geystay

> si sharci darro ah u isticmaalida guriga

> ka sii kireynta ama ku wareejinta guriga qof kale iyadoon uu ogolaan mulkiiluhu

> khatar gelinta ammaanka deriska

> la daahida kirada14 maalmood wax ka badan

> ku soo celcelinta 'jebinta waajibaadkaaga' sida sharciga waafaqsan

Macluumaadka khaaska ah ee ku saabsan kireystaha waxaa lagu qori karaa oo kaliya marka:

> kireystuhu sameeyo mid ka mid ah kuwaas kore; **iyo**

> marka mulkiiluhu ku leeyahay kiraystaha lacag ka badan inta debaajigu dabooli karo, ama Victorian Civil and Administrative Tribunal ay siisay mulkiilaha Amarka Lahaanshaha ee guriga ; iyo

> mulkiiluhu siiyo kireystaha nuqulka macluumaadka lagu qorayo keydka macluumaadka kireystaha; iyo

> mulkiiluhu uu siiyey kireystaha 14 maalmood inuu ku soo jawaabo (ama uu qaaday talaabooyin macquul ah si uu ula xiriiro kireystaha) iyo inuu tixgeliyey wixii jawaab ah ee kireystuhu keenay.

Hubinta liiska qoraalka

Kireynstayaashu waxay xaq u leeyihiin inay jeegareeyaan liiska qoraalka ee laga sameeyey iyaga keydka kireystayaasha. Si aad u jeegareyso liiska qoraalka, u soo dir codsi qoraal ah mulkiilaha ama shirkada keydka macluumaadka. Waa inay bixiyaan nuqulka macluumaadka liiska ku jira 14 maalmood ka dib markay helaan codsigaaga qoraalka ah.

Mulkiilaha ama shirkada keydka macluumaadka waxay kugu dalici kartaa lacag ujro siinta macluumaadkan ah laakiinse waa inaysan noqon qadar xad dhaaf ah.

Warqada danbe ayuu la socotaa…

TENANTS UNION of Victoria Ltd

Barclay MIS Risk Management
www.barclaymis.com.au
☎ 1300 883 916

Ntd (National Tenancy Database)
www.ntd.net.au
☎ 1300 563 826

TICA (Tenant Information Centre of Australia)
www.tica.com.au
✉ TICA at PO Box 120 Concord NSW 2137
*TICA waxay leedahay 1900 lambar oo loogu talagalay weydiimaha kireysta oo daqiiqadii kugu dalacaya $5.45 (waqtiga daabacaada), way ka badan tahay taleefanada gacanta iyo taleefanada lacagta lagu dirsado.

Si aad u bedesho liiska qoraalka keydka macluumaadka

Haddii ay kula tahay in macluumaadka kugu saabsan adiga uu yahay mid aan sax aheyn, dhammeystirneyn, jahwareerinaya ama aan ahayn kii ugu danbeeyey, ku wargeli mulkiilaha ama wakiilka guriga qoraal ahaan. Mulkiilaha ama wakiilka waxay heystaan 7 maalmood inay ku wargeliyaan shirkada keydka macluumaadka qoraal ahaan inay saxaan qoraalka ama ka saaraan.

Shirkada keydka macluumaadka waa inay saxdaa ama ka saartaa qoraalka liiska 14 maalmood gudahood markay hesho ogeysiiska oo qoraal ah.

Liiska qoraalku intuu jirayo

Liiska qoraalku wuxuu ku jirayaa keydka macluumaadka kireysiga ugu badnaan 3 sanno. Si kastaba ha ahaatee waa in dhaqso looga saaraa haddii uusan cusbeyn.

Liiska qoraalku wuxuu noqdaa 'mid aan cusbeyn'haddii la sameeyey deyn dartii ama oo deyntaa lagu bixiyey 3 bilood ka dib markii wakhtigeedii uu soo galay, ama haddii la sameeyey sabab ah Amarka Lahaanshaha oo amarkaas laga noqday (oo micnaheedu yahay lagu bedelay) dhageysi maxkamadeed dib u eegid ah ee Victorian Civil and Administrative Tribunal.

Sixitaanka ama saarida qoraalka liiska

Kireystayaashu waxay ka dalban karaan Victorian Civil and Administrative Tribunal ama lagu joojinayo in mulkiiluhu ama shirkada keydka macluumaadku inay ku qoraan liiska keydka macluumaadka. Waxaad sidoo kale dalban kartaa amar ah in mulkiilaha ama shirkada keydka macluumaadka ay saxaan ama ka saaraan liiska aan saxa aheyn, aan dhammeystirneyn, aan caddeyn, 3 sanno ka badan jira ama cusbeyn.

Kireystayaashu waxay sidoo kale ka dalban karaan Maxkamada amar in shirkadu keydka macluumaadka ay ka saarto liiska qoraalka marka shirkadu ay ku guuldareysatay inay fuliso codsigii mulkiiluhu inuu ku saxo ama ka saaro macluumaadka.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee kuwan soo socda daabacaadaha Ururka Kireystayaasha Victoria:

> ***The Victorian Civil and Administrative Tribunal*** warqada xaqiiqda

> ***'A Day at the Bench'*** DVD iyo buugga gacanta

> ***tusahaaga tallaabo tallaabada ah ee tegida Maxkamada***

Wixii macluumaad dheeraad ah wac Tenants Union Advice Line ☎ (03) 9416 2577.

Macluumaadkan waa tuse keliya waana inaan loo isticmaalin bedelka tallada sharciga ee aqoonta leh.
Tenants Union of Victoria Ltd ACN 081 348 227 **September 2011** www.tuv.org.au

TENANTS UNION of Victoria Ltd

fact sheet